

Dib-u-celinta Dheellitirka: Sida Ay U Saameyso Gunnooyinkaaga Canshuurta

Tani waxay dhacdaa marka Waaxda Canshuuraha ee Minnesota ay isticmaasho lacagta canshuur celintaada si ay u bixiso deymaha canshuuraha ama deymaha kale ee lagaa rabo. Lacagtan waxay ka iman kartaa gunnooyinka canshuurta ee soo socda:

- Gunnada Canshuurta Carruurta
- Gunnada Qoyska Shaqeeya
- Gunnada Carruurta iyo Daryeelka Ku Xiran
- Gunnada Waxbarashada K-12
- Gunnada Waalidiinta Carruurta Dhinta Dhalashada Kahor
- Gunnada Canshuurta Dib Looga Bixiyey Wisconsin.

Sidee baan ku ogaan karaa haddii dib-u-celinta dheellitirka ay dhacdo?

Dib-u-celinta Dheellitirka waxay Dhacaysaa Haddii Aad Deyn Ka Qabto:

- Waaxda Canshuuraha ee Minnesota
- Hay'adaha kale ee dowlaadeed (oo ay ku jiraan IRS ama hay'adaha gobolka Wisconsin)
- Hay'adaha kale ee soo gudbiyey deymaha lagaa rabo inay Waaxda Canshuuraha ururiso
- Dalabyada "Revenue Recapture" ee loo soo gudbiyey Waaxda Canshuuraha

Waxaan kuu soo diri doonaa warqad sharxaysa in dheellitirku dhacay, meesha aan lacagta ku isticmaalnay, iyo waxa aad sameyn karto haddii wax su'aalo ah aad qabto.

Maxaa Ugu Habboon Inaan U Codsado Gunnada Canshuuraha Haddii Aan Leeyahay Deyn Kale?

Gunnadaada la soo celin karo waxay kaa caawin kartaa dhimista ama bixinta deymaha aan kor ku soo sheegnay.

Ma Joojin Karaa In Dib-u-Celinta Dheellitirku Dhaco?

Haddii aad la kulanto dhibaato dhaqaale, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto in laga fogaado dheellitirkan ama laguugo soo celiyo dib-u-celinta haddii horey loo isticmaalay.

Wixii macluumaad dheeraad ah, wac Xafiska Difaaca Xuquuqda Canshuur-bixiyaha: 651-556-6013 ama 1-855-452-0767 ama booqo www.revenue.state.mn.us/contact-tra.

Meesha Aan Ku Istimaalnay Dib-u-Celinta	Hay'adda Lala Xiriirayo
<ul style="list-style-type: none">• Hay'adaha canshuuraha ee gobollada kale• Dalabyada ka yimid hay'adaha kale ee dowlad goboleedka Minnesota• Canshuuraha federaalka ama deymo canshuuraha aan ahayn	Hay'adda tixraaca ee ku xusan warqadda aan kuu soo dirnay ee ku saabsan dheellitirkan.
<ul style="list-style-type: none">• Deymaha canshuuraha ee gobolka Minnesota• Deymaha hay'adaha kale	Xafiska Xuquuqda Canshuur-bixiyaha <ul style="list-style-type: none">• Telefoon: 651-556-6013 ama 1-855-452-0767• Email: dor.tra@state.mn.us• Website: www.revenue.state.mn.us/contact-tra